

# Ku soo Dhowoow Scotland (Welcome to Scotland)

Waxaa dhici karta inaad cabsi dareemayso, argagaxsan tahay, iyo kelinimo ama aad su'aalo ku saabsan imaatinkaaga Scotland is waydiinayso. Wax walba way kugu cusub yihiin si kalena kuula muuqdaan maxaa yeelay ma garanaysid qofna waxaana dareemaysaa hiloow (homesick). Arrimuhu waxay qaadan doonaan waqti laakiin waa ay sii hagaagi doonaan. Tusahan waxuu ku siinayaa akhbaar sida aad caawinaad u heli lahayd, waxyaalaha aad ka samayn karto gudaha Glasgow iyo dhammaan waxa ku saabsan xaquuqahaaga.

Waxaanu rajaynaynaa inaad ku raaxaysato akhrinta tusahan aadna u aragto akhbaarta dhammaantood inay yihiin kuwo ku anfaci doona.



**Young Survivors - Steps to the Future Group**  
Glasgow 2006  
(Reprinted 2010)

phf Paul Hamlyn  
Foundation



The Scottish  
Government



Glasgow  
CITY COUNCIL

scottish  
refugee  
council

# Helitaanka Jidkaaga ee Tusahan

## Kalmaidaha adag

Waxaa dhici karta kalmaidaha qaar ee ku jira tusahan inay noqdaan kuwo kugu adag inaad fahanto. Qaar ka mid ah kalmaidaha waa Ingiriis waxaana ay wataan lambaro waxaana lagu sharxay erey bixinta ee gadaasha buugan.

## Buuga Cinwaanada

Gebi ahaan tusahan waxaanu magacawney ururo badan oo kale duwan ee jira si ay adiga kuu siiyaan caawimaad iyo taageero. Akhbaar dheeraad ah ee ku saabsan ururadan iyo ururo kale waxaad isticmaali kartraa Buuga Cinwaanada ee gadaasha tusahan.



## Farriin ku socota dadka dhalinyarada ah ee deggen bannaanka Glasgow

Haddii aad tahay qof dhalinyaro ah ee ku nool isla markaana waydiistay magangalyo meelo kale ee ka mid Scotland, oo bannaanka Glasgow ka ah, akhbaarta ku jirta tusahan adiga xitaa waxay kuu tahay muhiim inaad akhriso. Inta badan ururada ku jira liiska waxay xaruntoodu tahay Glasgow, laakiin haddii aad ka wacdo Golaha Qaxootiga Scottish telefoon lambarkooda lacag la'aanta ah 0800 085 6087 waxay kugu xiri karaan ururada aaga degaankaaga.

## Ogaysiis ku socda Adeeg Bixiyeyaasha

In kastoo akhbaarta ku jirta daabacaadan loogu talo galay dad dhalinyaro ah oo magangalyo doon ah ee aan la wehlin haddana waxaanu jecelnahay inaanu ku dhiiri gelino dadka adeegyada bixiya ee iyaga taageeraya inay akhriyaan tusahan isla markaana hubiyaan inay fahmeen akhbaarta ku jirta oo idil. Kani waxuu siinayaa iyaga aqoon ku filan si uu ugu sheego waxyaalaha uu buuggu ka kooban yahay dadka dhalinta yar ee ku jira xanaanadooda.

### Mahadnaqyo

Tusahan waxaa soo saaray Golaha Qaxootiga ee Scottish iyo *the big step*. Tusaha buuggan waxaa markii hore muujiyay 'Young Survivors Steps to the Future Group', kaasoo ah koox dad dhalinyaro magangalyo-doon aan la wehlin ah waxaana caawiyay *the big step*. Dadka dhlinta yar ee matala kooxdan waxay dareemeen inay jirto xog la'aan gaar ah ee ku saabsan nidaamka qaxootinimada (asylum process<sup>3</sup>) iyo xaquuqahooda. Muhiimada akhbaartan waxaa sii taageeray cilmi baaris ay samaysay Scottish Refugee Council iyo Xarunta Caruurta iyo Bulshada ee Glasgow (Glasgow Centre for the Child and Society) ee Jaamcadda Glasgow taasoo eegtay baahiyaha iyo waxyaalaha ay la kulmaan caruurta magan galyo doonka ah ee ku nool Scotland.

Si loo xaqiijiyo in macluumaadku usahlanaado sidii ay dadka da'yarta ahi u heli lahaayeen, bilow ahaan waxaa loo aqoonsaday in dadka da'yarta ah ee ku lug lahaa 'Young Survivors' kooxdu waxay ka qayb qaadanayaan horumarkooda intaa kadib da'yarta ka timid Campus ee sidoo kale gacan ka gaysatay wax kabadalka 2010. Kooxda 'Young Survivors' waxay aad uga shaqeeyeen horumarinta fikrada guud; iyadoo ay ku jirto xulashada iyo wada shaqayn hoose ee nashqad yaqaaniinta ay ku hindiseen fikrada ay ka kooban taheyd.

Natiijadu waxay noqotay tusahan oo ay inta badan soo saareen una soo saareen dadka dhalinyarada magangalyo-doonka ah ee aanan la wehlin.

Golaha Qaxootiga ee Scottish iyo Golaha Magaalada Glasgow waxay mahad u celinayaan gacan ka gaysashadii wayneyd ee sameeyeen da'yarta ka socotay 'Young Survivors Steps to the Future Group' iyo gacan gaysashadii ku xigtay ee sameeyeen da'yarta ka socotay Campus ee ya wax kaga bedaleen kooxda 2010.

Waayoaragnimadoodii shakhsiga ahayd iyo fikirkooda ee waydiisashada magangalyada Scotland gudaheeda waxay u ahaayeen waxaan la qiimayn karin soo saaritaankii tusahan. Waxaa la rajaynayaa iyadoo la raacayo wayoaragnimooyinka, dhalinyarada kale ee isla xaaladaas ku jira inay noqdaan kuwo wax badan ka og arrimaha waawayn ee mihiimka ah marka la imaanayo lana degayo Scotland, la waydiisanayo magangalyo iyo fahanka xaquuqahooda.

Haddii aad jeceshahay tababar dheeraad ah ama hagitaan ee sida loo isticmaalo tusahan fadlan la xiriir Scottish Refugee Council.

Feebarwari 2010

# Tusmo

## **Ku soo Dhowoow Scotland**

Ku soo Dhowoow Glasgow “Glesga”	01
Wax gadasho	02
Dhaqanka iyo Nasashada	05
Taageero	13
Hanjabaad (Bullying)	14

## **Dalbashadaada Magangalyo doonka**

Sababta laguugu yeero qof aan la wehlin (Unaccompanied) Cunug Magangalyo-doon ah [Asylum-Seeking Child (UASC)] ama cunug dadkiisa ka baxay?	20
Magangalyo doonka & sharciga	21
Magangalyo doon	22
Sidee u waydiinaysaa magangalyo?	22
Sababtee ayaad ugu baahan tahay qof sharci ah oo ku matala?	23
Ma tahay mid aanan ku faraxsanayn qofka sharciga ee ku matalaya?	24
Tarjumaanada	25
Maxaa dhicaya waraysigaaga baarista?	25
Tegistaada Wasaarada Arrimaha Gudaha	27
Buuxintaada foomka qoraalka caddaynta [statement of evidence form (SEF)]	27
Go'aankaaga magangalyodoonka	29
Samaynta racfaankal	30
Dalbashada sii Fidinta Joogistaada/Dib u eegis imminka socota	31
Maxaa dhacaya haddii dalbashadaada magan galyada si buuxda loo diido?	33
Maxaa dhacaya haddii aadan racfaan qaadan karin?	34

Ka warran haddii aad hesho go'aan wanaagsan ee dalbashadaada maganagalyada?	35
Dokumentiga lagu Safro (Travel Document)	36
La xiriirida Xubnaha Qoyska	37

## **Xaquuqahaaga**

Adeega Xaquuqaha Caruurta (Glasgow)	40
Maxay kula tahay haddii lagu xanaaneeyo?	41
Dad sidii waalid oo kale kuu ah [Foster parent(s)] ama degaanka wax lagu xanaaneeyo (residential care)?	42
Xaquuqdaada inaad leedahay cod	42
Kulamadaada	44
Xaquuqdaada inaad la xiriirto dadka muhiimka kuu ah adiga	47
Qorshahaaga xanaanaynta	48
Waqtigaaga qof-ka-qofka	48
Waxbarashadaada	50
Caafimaadkaaga	51
Xanaanaynta naftaada	52
Arrimahaaga gaarka ah iyo sirtaada	53
Helitaanka akhbaartaada shakhsi iyo diiwaanadaada (records)	54
Horay u socosho	55
Sharciyda meesha aad ku nooshahay	57
Xaquuqdaada inaad cabasho samayso	61

**Erey bixin** 64

**Buuga Cinwaanada** 70

**Qariidada wayn ee Glasgow  
(The Big Map of Glasgow)**

**Nidaamka Magangalyada**

**Dadka Adiga ku Taageeraya**